



Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan goobta Barnaamijka Pioneer

Iyada oo la eegayo macluumaadka cusub, hoggaamiyeyaasha Degmada ee PPS waxay go'aansadeen in Barnaamijka Pioneer uu sii ahaan doono xarunta Holladay-Youngson kaasi oo loogu talagalay sanad dugsiyeedka 2018-19-ka. PPS waxaa ka go'an xaqiijinta in dhammaan ardayda oo idil ay helaan waayo-aragnimo waxbarasho oo tayo sare leh oo ka jirta jawiga waxbarasho oo wanaagsan isla markaana taageero leh.

Degmadu waxay dhawaan xaqiijisay qiyaasaha kharashka dhismaha iyo meel kale u wareejinta, iyo waqtiga loo qabtay nidaamka oggolaanshaha degdega ah; ma aanu aaminsanin hadda in ay macquul tahay in aanu diyaarin karno Applegate iyo Rice si ay buuxiyaan baahiyaha gaarka ah ee ardayda Pioneer ee Dayrta 2018-ka. Bulshada Pioneer ayaa ka hadlay arrimaha muhiimka ah ee ku saabsan baahiyaha ardaydani iyaga oo bixiyay aragti muhiim ah oo ku aadan nidaamkeena qorsheynta. Marka la eego arrimahani iyo jadwalka xaddidan, hada ka dib ma aha mid caqli gal ah in la sii wado qorshaha meel kale loogu wareejinayo barnaamijka Pioneer.

Degmadu waxay bilaabi doontaa nidaamka go'aaminta habka ugu wanaagsan ee hore loogu sii soconayo iyada oo wada shaqeyn lala yeelanayo Applegate Head Start, Xarunta Guusha Ardayga, barnaamijyada ka jira Rice iyo bulshooyinka rayidka ah ee ACCESS ee uu saameynta ku yeeshay isbedelkan ku yimiday qorshaha.

Waxaanu uga mahad celinaynaa dhammaan bulshooyinka dugsiya samirka ay muujiyeen iyo u doodistooda bilihii la soo dhaafay.

Guadalupe Guerrero, Kormeeraha Guud